

**La dooranayo Ilaaliye/hanti ilaaliye
Ladooranayo qof xirfad leh**

**Selecting a Guardian/Conservator
Choosing a Professional**

Daabacaada hay-ada MAGIC: waa hay-ad la socota isbedelka iyo goaan sameeynta.

Waa maxay qof masuul ah ama qof hanti masuulka ah? (What is a Guardian or Conservator?)

Waa qof lagu siiyay awood inuu go-aano u gaari karo qof aanan awoodin inuu samayto goaan. Hanti ilaaliye (a conservator) waa qof awood loosiiyay inuu go-aamiyo, go-aanada qofkale uu isagu go-aamin karin oo ku saabsan hantidiisa.

Labadaba, ilaaliye iyo hanti ilaaliyeba waxaa magacawda maxkamada

Qofka leh qof kamasuulka ah (ward)

Qofka la-ilaalinaayo (Person who has a conservator)

Si sharci ah qoshe u sameeyn (legal arrangements) Guardianship/Conservatorship

Yaa noqonkara Masuul ama hanti ilaaliye (Who May Be a Guardian or Conservator?)

Qoyskaaga, saaxiib, bangiga, shirkad, qof masuul ilaaliye and hanti ilaaliye ah, hayadaha waxtara dadwaynaha, ama qofkii xiisaynaya oo ay maxkamadi ogolaatay. Shaqadana way wadaagikaraan haday doonaan.

What are a Guardian's or Conservator's Responsibilities?

Waa maxay masuuliyada ilaaliyaha ama hanti ilaaliyaha?

Kan ma suulka lagayahay ayay kuxirantahay haduu dharsiinayo, haduu gurigiisa soo seexinaayo, haduu dhahaayo daawada side u qaataa, maxkamadu shuqul kuma laha arintaas, sidoo kale hanti ilaaliyaha maxkamadu shuqul kuma leha siduu lacagta u maamulo maadaama uu raali ka yahay qofka uu u shaqeeyo.

Side loo ilaaliyaa ilaaliyaha iyo kan la ilaalinaayo?

Maxkamada ayaa kor kala socota shaqada ilaaliyaha. Sanadwalba waxuu soo gudbinaayaa xaaladaha uu ladsay iyo dhaqaalihii uu gacanta uu ku hayay, sida hadii la mamnuucay jeegag, waxii bangiga kabaxay iyo soogalay. Waxii si musuq maasuq iyo is dabamarin ku jiro dawlada ayaa talaabo ka qaadaysa. Marwalba waa la waydiinkaraa in la bedalo ilaaliyaha/amah anti hayaha. Hadii aad shakiso intaadan dacwo ku ordin, si toos ah ulahad qofka kuu shaqeeya. Dhibaatooyinka badankooda waxaa lagu xalinkaraa wadahal is xushmeen ku jirto. Badanaaba madhacdo laa kiin hadii aad xalin waydo laxiriir

1. laxiriir (County probate court) maxkamada kuugu dhow oo arimahaan ka shaqeeya
2. Dacwo xaree, dhaqan xumo, iyo six un u isticmaalid dhaqaalaha (Adult protection)
3. Hadii ay sheekadu tahay xadis ama dembi wayn wac booliska

Yaa lacagta siiya kuwa kuu shaqeenaya?

Lacagta ku baxda maxkamada, abuukaataha, waxaa laga qaadayaa qofka masuulka laga ahaa hantidiisa. Hadii uu qofkaasna uu lacag haysan waxaa laga yaabaa inay degmedaas wax ka bixiso.

Goormaa loo baahan yahay qof khabiir ku ah ilaalinta ama hanti ilaalinta?

Waydii maxkamada qof khabiir ku ah arimahaan. Marka ehelka ama familigaaga layska horyimaado, markii qof ahaan dhaqaalo dhibaatooyin aadna rabin in ehelkaaga aad soodhibto sababtoo ah meel kala fog ayaad kala degantihin. Waxii wax wayn ah oo si fudud lagu xalinkarin waydiiso (Professional Guardian/Conservator) dad arintaan khabiir ku ah

Sidee ku helaa qof arintaan khabiir ku ah

Dadkaas meelaha lagahelo waxaa ku siin kara ama ka helikartaa isbitaalada, meelaha dadka duqoobay lagu xanaaneeyo, xafiisyada komunitiyada, xafiisyada garyaqaanada, iwm.

MAGIC: anaga xataa waad naga helaysaa dad aad khabiir u ah arimahaan ku takhasusay

Sidee u doortaa qof arintaan khabiir ku ah

Markii lagu siiyo meelaha aad ka heli karto ilaaliyaasha ama hanti ilaaliyaash. Ka wareeyso taariikhdooda, cilmigooda, dhaqankooda, inay hada kahor lashaqeeyeen dad diimo kaladuwan leh iyo wadamo kaladuwan kayimid. Si fiican u fahan lacagaha ay dadka ku dalacaan, hadii ay lacagta ka dhamaato xagee bay lacag ka helaayaan, way diih su aalahaas oodhan. Waydiih qofkaas xageebuu deganyahay oo uu ka imaanayaa, qofka howl fiican inuu qabto ma la socdaan, haduu dhaco arindeg deg ah sidee lagula soo xiriiraa, side lacagta loo maa mulaayaa, iyo hadii guriga la iibsho side arintaan loo xalinaayaa.

La shaqaynta dadka khabiirka ku ah ilaalinta ama ilaalinta hantida qofka

Waa kuu wanaagsantahay inaad la leedahay xiriir fiican dadka ehelkaaga, saaxiibayaashaa, iyo ilaalayaashaada. Waydiih siday shaqadooda u qabanaayaan, usheeg waxa aad doonaysid. Wakhti samayso aad adiga iyo qofka ku caawiya aad u wada hadashaan si aad u ogaatid waxa soo kordhay.

DADKA WAAYA ARAGA U LEH SHAQADAAN IYO EHELKAAGABA WAA ISKU MURAAD: SI FIICAN UGA TAXADIR DADKA AAD JECESHAHAY!

Minnesota Association for Guardianship & Conservatorship

P.O. Box 14246 St. Paul, MN 55114

(651) 292-9131

www.minnesotaguardianship.org